

MACLUUMAADKA BUKAAN JIFKA

# Gabapentin Actavis

Dawaynta qalalka



## Xog muhiim ah!

Daryeel gaar ah sii Gabapentin Actavis:

- Haddii aad leedahaykelya fadhiisi/dhibaatooyinka kelyahaaga
- Haddii aad qaadato maydhida kelyaha oo ay ku soo marto muruq xanuun ama aad kobcsio daciifnimo muruqa ah, la xidhiidh dhakhtakaaga
- Haddii aad leedahay calool xanuun joogta ah, aad yalaalagoonayso ama matag, isla markaaba la xidhiidh dhakhtarkaaga

## Sida loo isticmaalo Gabapentin Actavis

Had iyo jeer u qaado Gabapentin Actavis sida uu dhakhtarkaagu ku faro. Haddii aanad hubin, waa in aad raadisaa tallada dhakhtarkaaga ama shaqaalaha farmasiigaaga Daawayntu caadi ahaan waxay ku bilaabantaa dawo qaadasho hoosaysa taas oo ka dib aayar aayar loo kordhiyo. Waxay qaadan kartaa muddo in la helo dawo qaadashada adiga kugu habboon. Gabapentin Actavis kabsoolku waa in lagu liqaa dhammaanteed biyo badan. Ha calaalin kabsoolka. Gabapentin Actavis waxaa lagu qaada cunto ama cunto la'aan.

Had iyo jeer qaado dhammaan dawo qaadashada sida uu u qoro dhakhtarkaagu. Weligaa ha qaadan qayb kaabsoolka ah.



## Intee in leeg ayay daawayntu soconaysaa?

Dhakhtarkaagu waxa uu si wada jir ah adiga kuula go'aamiyaa ilaa inta daawayntaadu socon doonto. Waa muhiim in aanad joojin daawayntaada adigoo la xidhiidhin dhakhtarka Joojin kedis ah oo daawaynta Gabapentin Actavis waxay keeni kartaa korodhka halista tirada qalalaka ama suuxdinta. Haddii, sabab kastaba, daawayntaadu joogsatay, qadarka dawo qaadashada waa in loo yareeyaa si aayar aayar ah sida lagu sheegay dawo qorista aad ka hesho dhakhtarkaaga.


## Maxaan samaynayaa haddii aan qaatay Gabapentin Actavis aad u fara badan?

Haddii aad qaadatay Gabapentin Actavis aad u fara

badan, ama haddii ilma yar uu u qaatay dawada khalad ahaan, waa in aad isla markaabala xidhiidhaa dhakhtar, shaqaalaha cusbitaalka, shaqaalaha farmasiiga ama Xarunta Macluumaadka Sunta (garaac 112) wixii waano ah iyo qiimaynta halista.

## Maxaan samayn doonaa haddii aan ilaabo in aan qaato dawadayda?

Ha qaadan kaabsool dheeraad ah si aad ugu mag dhowdo dawo qaadasho la ilaabay, Haddii aad ilowday in aad qaadao dawadaada, waydii dhakhtarkaaha sida aad dib ugu bilaabayso. Tani aad bay muhiim u tahay haddii muddo wakhti ah ay dhaaftay laga bilaabo dawa qaadashadaadii u damabaysay.



MACLUUMAADKA BUKAAN JIIFKA

# Gabapentin Actavis

Dawaynta qalalka

## Waa maxay saamaynta aan wanaagsanayn ee dawada ee aadka loo yaqaanaa?

Sida dawooyinka kale, Gabapentin Actavis waxay keeni kartaa saamaynta dawo oo aan wanaagsanayn ma laakiin ma aha dhammaan dadka qaadanaya oo dhan kuwa lama huraan ahaan ay dhib ka soo gaadhi doonto. Saamaynta dawada ee aan fiicnayn “ aad baa loo yaqaana” oo waxay dhacaan in ka badan 1 qof 10 bukaan jiif ba waxa ka mid ah lulo, dawakhaad, isku xidh la'aan iyo daal.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan saamaynta dawada ee aan wanaagsanayn waxaa laga heli karaa warqadda macluumaadka ee ku jirta xidhmada.

## Maqaadan karaa dawooyin kale?

Saamaynta dawada ee aan wanaagsanayn Gabapentin Actavis way isbeddeli kartaa oo waxaa kordhi kara saamaynta aan wanaagsanayn haddii aad qaadato dawooyin kale oo gaar ah wakhtiyada isku mid ah. Qoraal kuwan aha waxaa laga heli karaa warqadda macluumaadka ee gudaha xidhamada.

Had iyo jeer u sheeg dhakhtarka haddii aad qaadanayso ama aad dhawaan qaadatay dawooyin kale. Tan waxaa ka mid dawooyin la qaato iyagoon lagu qorin iyo daawaynta dabiiciga ah.

## Gaadhi ma kaxayn karaa?

Gabapentin waxay sababai kartaa dawakhaad, lulo iyo daal. Sidaas awgeed, waa in aanad gaadhi kaxayn, aanad ku shaqayn mishiin adag ama aanad fulin hawl kale oo la fili karo in ay khtar noqoto ilaa aad taqaano halka ay dawadani ka saamayso kartidaada aad ku fuliso hawlahaas.



Waxaad masuul katahay go'aansashada hadduu aad ku jirto xaalad aan ku wado gaadhi ama aad samaynayso shaqo u baahan adigu in aad aad u digtoonaa. Si kastaba ha ahaatee, xusuuso marka aad suuxdinta leedahay, laguuma ogola in aad gaadhi kaxayso marka aad soo dhaaftay hal sano oo bbuuxa oo aan suuxdin lahayn.

## Ma cabbi karaa khamro?

Waxaa jira xayiraado gaar ah oo khuseeya qaadashada khamrada, oo ka baxsan talada guud in laga feejignaado qaadashada khamro xad dhaaf ah, gaar ahaan haddii aad la xanuusanayso qalal.

## Uurka iyo naasnuujinta

Gabapentin Actavis waa in la qaadan muddada uurka iyaddoo dhakhtarkaagu uu kuu sheego in aad sidaa yeesho mooyee. Ma jirto wax daraasad ah oo baaday gabapentin haweenka uurka leh, laakiin waxaa la soo weriyay in dawooyinka kale ee suuxdintu ay keeneen halis kordhaysa oo dhaawaca ilmaha uurka ku jir aah, gaar ahaan marka dhowr daawooyinkaas ah la isticmaalo isku wakhti. Sidaas awgeed, haweenka uurka waa in loo qorsheeyaa haween ahaan suuxsinta leh sidaasna daawooyinkooda waxaa lagu qiyaasi karaa oo waa la yarayn karaa halista foolxumada ilmaha.



Gabapentin Actavis waxa uu soo raacaa caanaha naaska. Saamyna naasnuujinta ilmahu lama oga. Sidaas awgeed, waa in aad had iyo jeer la xidhiidhaa dhakhtark ka hor inta aanad isticmaalin Gabapentin Actavis marka aad naasnuujinayso.




---



---



---



---

